


159 Melrose Street ayaa qeyb ka ah marxaladda xigta ee dib-u-dhiska dabaqyada dhaadheer

Dadka goobta degan waxba loogama baahna inay hada sameeyaan.

Laga bilaabo bartamaha sanadka 2026 ilaa bisha Febraayo ee sanadka 2028 waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa dadka guryaha degan si aan u helno guri daboolaya baahiyahaaga, kuwaas oo ay ka mid yihiin guryo kaa ag dhow.



Dabayaaqada sanadkan waxaan ku casuumi doonnaa dadka degan 159 Melrose Street inay arkaan guryaha la dhammeeyay ee ku yaal Holland Court, Flemington.



Kulamo lagula wadaagayo macluumaad dadka deegaanka, asxaabtooda iyo qoyskoodaba

Waxaan halkaan u joognaa inaanu si fool-ka-fool ah iyo qaab online ah ba oo la hadalno dadka deggan 159 Melrose Street, iyaga iyo asxaabtooda iyo qoyskoodaba. Waxaad eegtaa xaashiyaha iyo qoraalada lagu dhajiyay meelaha laga soo galo si aad u ogaato maalmaha iyo xilliyada la qabanayo kulamada ama booqo [homes.vic.gov.au/events](https://www.homes.vic.gov.au/events).

Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga




Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

[homes.vic.gov.au/north-melbourne-precinct](https://www.homes.vic.gov.au/north-melbourne-precinct)



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**



homes victoria

DHISMAHA GURYAHA EE WEYN

Wixii ku soo cusboonaaday **Bulshada Waqooyiga (North) Melbourne**

Waxa ka socda goobta

Howlo dayactir oo laga sameynayo Canning Street

Shaqooyin culus ayaa wali kasii socda darbiyada xagooda kore, marinnada iyo qolalka dharka lagu dhaqdo

Marxaladda xigta ee dib-u-dhiska dhismooyinka dhaadheer ee 159 Melrose Street

Dib-u-dhiska dhismooyinka dhaadheer ee Crown Street, Flemington iyo Ormond Street, Kensington ayaa sidoo kale meel fiican maraya

Macluumaad loogu talagalay dadka guryaha ku yaal 159 Melrose Street kirada ugu jira

Kulamo aad xog ku heli karto oo loogu talagalay dadka goobta degan, asxaabtooda iyo qoyskoodaba kuwaas oo aad ooga qaybgali karto si fool-ka-fool ah ama qaab online ah

Gurigii ugu horeeyay ee ku yaal Holland Court ayaa la dhameystiray



Iskaan garee QR koodhka si aad u aragto sifooyinka cusub

Jadwalka shaqo ee dhismaha inta aan la burburin

33 Alfred Street, North Melbourne

2025

1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

2026: Waa nakan

2. Diyaargarowga

- ✓ Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- ✓ Hubinta isku xirka adeegga
- ✓ Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo amaan howlahooda ammaan laga dhigayo
- ✓ Gudaha dhismaha ayay shaqo ka soconaysaa si meesha amaan looga dhigo looguna diyaariyo in la burburiyo

3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada

33 Alfred Street

Dadka ayaa waqti xaadirkan guuraya

Howlaha shaqo

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo qayb ka ah guryaha laga guuray ayaa laga saarayaa
- Rakibaadda albaabada amniga ayaa la filayaa in la dhameystiro ka hor 16-ka bisha Febraayo

Ballamaha Xafiiska Guryaha ee Xaafadaada

Kooxda xafiiska guryaha ee xaafadaada hadda waxaa laga heli karaa 12 Churchill Avenue, Ascot Vale

Haddad rabtana waxaad la xiriiri kartaa kooxda North Melbourne:

- sidii caadiga ahaydba u wac ama email u dir howlwadeenka guryaha
- wac ama iimayl u dir si aad ballan ooga qabsato howlwadeenka guryaha ee North Melbourne
- Xilli rabto ayaad imaan kartaa xafiiska Ascot Vale

Muunado yar oo alaabo ah ayaa laga qaadi doonaa guryaha bannaan, qolalka hortooda, meelaha wiishka iyo derbiyada bannaanka

- Kormeerista lagu sameynayo darbiyada dibadda ayaa la bilaabi doonaa
- Kormeerku wuxuu ka dhici doonaa darafyada galbeed, bari iyo koonfurta dhismaha iyadoo meelo koobanna deyr lagu wareejin doono si loo sugo ammaanka goobta
- Shaqaaluhu waxay isticmaali doonaan wiish gaysa kor iyo hoos si aysan u saameyn guryaha la degan yahay
- Waxaa dhici karta in muddo kooban la maqlo shanqadha qalabka wax lagu dalooliyo
- Shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay shaqeeyaan sabtida si loo hubiyo in shaqada la dhameystiro inta aan bisha Ramadan la gaarin

Agagaarka xaafada

Casriyeynta amniga ayaa wali socota

- Qandaraaslayaasha iyo mas'uuliyiinta ayaa soo booqan doona goobta maalmo kala duwan si ay kormeeris u sameeyaan
- Hubinta isku xirka adeegga
- Sahanka dhulka ee badbaadada mustaqbalka ee agagaarka xuduudaha goobta

159 Melrose Street

Marxaladda xigta ee dib-u-dhiska

Waxaan halkaan u joognaa inaan dadka goobta degan, asxaabtooda iyo qoyskoodaba kala hadalno dib u dejinta la sameyn doono mustaqbalka. Meelaha boodhadhka lagu soo dhajiyay ka eeg wixii macluumaad ah ee ku saabsan maalmaha iyo xilliyada ay qabsoomi doonaan kulamadu.

Howlaha shaqo

- Tijaabinta qalabka bixiya digniinaha dabka ee ag yaala wiishashka dabaq kasta ayaa la dhameystiri doonaa ugu dambeyn 16 ka bisha Febraayo



12 Sutton Street

Dib u dhiska mustaqbalka

76 Canning Street

Dib u dhiska mustaqbalka

- Shaqooyin dayactir oo muhiimka ah ayaa la wadaa bisha Oktoobar 2025 ilaa bisha Juun 2026
- Shaqaalaha shaqada haya ayaa waxay korayaan meelo si ay u gaaraan darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto
- Meelo wax lagu gooyay ayaa jiri doona si loo sugo ammaanka

Febraayo 2026

Howlaha shaqo iyo xafadaha soo socda ee ka dhici doona North Melbourne

Dhamaan shaqooyinka la qabanayo waxaa loo fulin doonaa heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- mararka qaar waxaa jiri kara shanqadh iyo boodh sidoo kalena waxaa 76 Canning Street lagu arki karaa shaqaale saaran wiishash
- Shanqadh muddo kooban ah oo ka dhalatay shaqaale saaran wiishash iyo qalabka dhagaxa lagu duleeliyo ayaa laga maqli doonaa 33 Alfred Street

Xilliyada aan shaqeyn doono waxaa hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee Golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 7am iyo 7pm

Sabti inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Mararka qaar waxaa loo baahan yahay in fasax laga helo golaha deegaanka si shaqada loo qabto wax ka baxsan saacadahan laakiin waan u sheegi doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir xafiiska guriyeynta ee deegaankaaga:

1300 360 462

northmelbourne.housing@dffh.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah oo uu ku jiro macluumaad ku qoran luuqadaada booqo homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au